

## Taageerida Da'yarta Ingiriiska Baranaysa ayadoo la adeegsanaayo Waydiimo iyo Jawaabo ku saabsan Khibrad

Shaybaarada Waxbarashada ee Gobalka Galbeed, Waqooyi galbeed, Waqooyi Bari iyo Jasiiradaha

*Ka timid Xarunta Qaran ee Qiimaynta Waxbarashada ee IES*

Qoysaska iyo daryeelayaasha, waxaad door muhiim ah ka ciyaaraysaa waxbarashada luuqada cunugaaga. Carruurta waxay xoojin karaan luuqadooda maalin kasta ayagoo waydiinaaya kana jawaabaaya su'aalo ku saabsan khibrad. Shaqadaan waxaad cunugaaga waydiin doontaa inuu ka hadlo khibrad uu la kulmay.

Niyada kuhaay:

- Adigga iyo cunugaagu waxaad adeegsan kartaan luuqadaada hooyo ama Ingiriis, hadba kii kuugu xoog badan adigga.
- Ku waydiinta iyo uga jawaabida su'aalaha luuqadaada hooyo ayaa sidoo kale ka caawinaysa cunugaaga inuu barto Ingiriiska.
- Waqtigaan la qaado cunugaaga. Wax isla barashadu waa baashaal!

## Maxaad u waydiinaysaa ugana jawaabaysaa su'aalo ku saabsan khibrad?

Waydiin iyo ka jawaabida su'aalo ku saabsan khibrad waxay u sahlayaa carruurta inay adkeeyaan luuqadooda.

### Aan biloowno!

Raac tallaabooyinka soo socda. **Gadala ka firi fikradaha khibrada iyo taageerooyinka dheeraadka ah ee luuqada.**



- ▶ **Talaabada 1 aad: La wadaag, uga sheeke, ama la abuur khibrad cunugaaga gudaha ama banaanka guriga.** Tusaale: *Diyaari ama cunto ama kusoo wareega xaafada adinkoo wada socda.*



- ▶ **Talaabada 2 aad: Waydi su'aalo** ku saabsan khibrad kahor, inta lagu jiro, ama dhammaadka.

- Ka caawi cunugaaga “balaarinta luuqadiisa.” Haddii cunugaagu uga jawaabo su'aalahaaga hal eray, waydii inuu erayo kale ku daro jawaabtiisa. Tusaale ayaad ka siin kartaa arrintaan.
- **Waydii su'aalaha dulmarka ah iyo kuwa macnaha hoose leh.** Su'aalaha dulmarka ah ayaa ka caawinaaya cunugaaga inuu xasuusto waxa uu sameeyay ama arkay. Tusaale: *Waa maxay sadexda ee aan ku aragnay beerta raaxada?* Su'aalaha gunta dheer ayaa ka caawinaaya cunugaaga inuu si fiican uga fakaro khibrad uuna isku keeno fikrado. Tusaale: *Aadista beerta raaxada miyaa ka fiican dheelista gaymamka muuqaalka ah? Sababta?*



- ▶ **Talaabada 3 aad: Ku dhiiri geli** cunugaaga inuu **sawiro ama qoraal la sameeyo** xogta khibrada.

**Yoolka Waxbarashada:** Carruurta waxay xoojin doonaan xirfadahooda luuqada hadalka.

**Buundooyinka:** Fasalka birimada–3aad

**Agabka:** Aqoonso ama abuur khibrad aad doonayso inaad la wadaagto cunugaaga; waraaq iyo qalimaanta midabka, qalin qori, ama qalin koobi

## Shaqada Qoyska iyo Daryeelaha: Taageerida Da'yarta Ingiriiska Baranaysa ayadoo la adeegsanaayo Waydiimo iyo Jawaabo ku saabsan Khibrad

### Noocyada Khibradaha Gudaha Guriga ka jira oo Kala Hadlayso Cunugaaga

- Diyaarinta, karinta, ama cunista cunto
- Ciyaarida gaym
- Kala hagaajinta qolka (jikada, musqusha, ama qolka jifka), marfash ama qaanad



### Noocyada Khibradaha Gudaha Guriga ka jira oo aad Kala Hadlayso Cunugaaga

- Kusoo wareegida xaafadiina
- Ku dheelida meel amaan ah
- Daawashada wax banaanka ka jira (xayawaannada, cayayaanka, geedaha soo baxaaya, dhirta, daruuraha, iwm.)



### Taageerooyinka Dheeraadka ah ee Luuqada

Cunugaaga ayaa balaarin kara ama kobcin kara luuqadiisa marka uu ku waydiinaayo kana jawaabaayo su'aalo ku saabsan khibrad. Iskuday inaad adeegsato su'aalaha iyo jawaabaha hoose intaad kala hadlayso khibrad cunugaaga.

Su'aalaha Dulmarka ah oo aad ka waydiinayso khibrad	Jawaabaha Laga Bixin karo
Maxaad ogaatay?	Waxaan ogaaday _____.
Maxaad la yaaban tahay _____?	Waxaan la yaaban nahay _____ iyo _____.
Waa maxay waxa cusub ee aad baratay maanta?	Hal wax oon bartay wuxuu ahaa _____.

Su'aalaha qotoda dheer ood Ka waydiinayso khibrad	Jawaabaha Laga Bixin karo
Xog badan iga sii sababta _____ ay u dhacday.	_____ way dhacday _____.
Ii sheeg sida aad ku heshay jawaabtaas.	Waxay ila tahay/waxaan ogahay _____ waayo _____.
Ii seeg sida aad ku oggaatay _____.	Waxaan ogahay _____ waayo _____.
Ii sheeg sababta aad u aaminayso/dareemayso _____.	Siday ila tahay, _____ waayo _____.

### Xujada Luuqada:

Carruurta waxay xoojin karaan luuqadooda maalin kasta ayagoo waydiinaaya kana jawaabaaya su'aalo ku saabsan khibrad. Hadda oo cunugaagu ka jawaabay **su'aalaha**, ku boori inuu **ku waydiiyo su'aalo** aad adigu ka jawaabayso oo ku saabsan khibrad. Carruurta way abuuri karaan su'aalo iskood ah si ay kuu waydiiyaan ama waxay adeegsan karaan qaar kamid ah su'aalaha ku jira shaxda kore. Waydiinta su'aalo waxay u sahlayaa carruurta inay balaarshaan luuqadooda isticmaalkooda maalin laha ah.